## Adeegyada Gargaarka Diiwaan Dambiyeedka ee Bilowga Cusub)

- Tirtiris (Diiditaan) ee Xukun Dambiyeed
- Qiyaastii. 47 Gargaar (Dib-u-qiimeynta Qaar ka mid ah Xadgudubyada heerarka Hoose in lagu daro ficil-dembiyeedyada yeryer)
- Qiyaastii. 64 Gargaar (Dib u Qiimeynta Dambiyada Qaar ee Marjuana)
- Mooshinada Lagu Yareynaayo Xukunada Xadgudubyada si looga dhigo ficil-dambiyeed yer
- Mooshinada Lagu Raadinaayo Joojinta Hore ee Xukun Dambiyeedka
- Shahaadooyinka Baxnaaninta / Cafiska Dambiyada ee Guddoomiyaha Gobolka
- Gargaarka Diiwaangelinta Koox-burcadeed
- Gargaarka Xukunka Dhibanayaasha Ka ganacsiga dadka
- Tirakoobka Xarunta Macluumaadka DNA-ga
- Sixitaanka Khaladaadka Waaxda Caddaaladda Diiwaanka Dembiyada
- Codsiyada Joojinta loogu talagalay Ka-qaybgalayaasha PC1000 sida waafaqsan PC1203.43
- Soo Xerogelinta Diiwaannada Xirtaanka Dadka Waaweyn

## Hadafkeena

Si loo ilaaliyo xuquuqda, xoriyada, iyo sharafta dadka ku nool Gobolka San Diego iyo ilaalinta daacadnimada iyo cadaalada Nidaamka Caddaaladda ee Mareykanka anago oo bixineyna matalaadda ugu fiican ee kiisaska naloo xilsaaray.

GOBOLKA SAN DIEGO

Office of the Public Defender
Fresh Start Program
450 B Street, Suite 900
San Diego, CA 92101

Taleefonka: 619-338-4700
Fakis: 619-338-4811
Imeeyl: Fresh.Start@sdcounty.ca.gov
www.sandiegocounty.gov/public_defender

# Barnaamijka Bilowga Cusub

## Gargaarka Diiwaangelinta Dembiyada Ballaaran

Gobolka San Diego
Xafiiska Difaaca Dadweynaha

# Fresh Start: Diiwaan denbi yaren faahfaasan

## The Fresh Start Program: Barnaamijka "Biloow Cusub"

Xukun denbiyeed wuxuu koosgareeyaa in ey adkaato sidii loo heli lahaa shaqo, guri, waxbarasho iyo fursadaha bulshada. Khabar wanaagsan waxaa eh in ey jiraan ikhtiyaaro kuu ogalaanaya in add hormartid, xataa hadii aad khaladaad horey ugashay, si aad ugu yaraysid xukinka denbiyad culus oo aad ooga dhigtid dembi fudud ama u tirtirdid diiwaanka denbigaaga. Si aad u heshid shahaado baxnaanin. Xafiisaka difaaca dadweynaha ee degmada San Diego wuxuu ju faraxsanyahay in uu kaa caawiyo Biloow Cusub (Fresh Start)

Si aan kugula talino sida ugu wanaagsan oo aan kuu siino ikhtiyaarada aad leedahey sidii xukunkaaga loo yareyn ama loo tirtiri lahaa, waxaan ka soo xasileynaa waaxda cadaalada ee gobalka California, diiwaanka denbiyadaada iyodoo aan lacag lagugu dalacin. Qareenadeena khibrada leh waxey dib ueegayaan diiwaanka denbiyadaada. Wexeyna diyaarin qorsheyn faahfaahsan oo ku dhisan 'Fresh Start" Biloow Cusub.

Qareenada wexey kaala tashan xeelada ugu wanaagsan ee horey loogu soconkaro. Iyo sidii loo heli lahaa fursadaha iyo dariiqyada laguugu caawimi karo si denbigaago loo yareeyo.

## Miyaad u baahantahay Qarane si aad u heshid denbi yaren?

Khasab ma aha. Qaar ka mid ah ikhtiyaarada barnaamijka dembi yareynta wey cadyihiin oo waa sahal sidii loo fahmi lahaa. Foomamka aad u baahantahay waxaad ka heli kartaa shabakada maxkamada sarre ee San Diego. Inkastoo aad u baahmeyn Qarene waa dhici karto in aad rabtid qarene. Waad shaqaaleysan/qabsan kartaa qarene. Sidoo kale xafiiskanaga baa kugu caawinikara bilaash.

## Ma kharash baa ku kici helitaanka Biloow Cusub?

Kuwo yar oo ka mid ah ikhtiyaarada denbi yareenta baa iska leh ujrad maxkamadeed. Hadii uu dakhligaada yaryahey "Fresh Start" wuxuu kaa caawin karaa sidii lagaaga dhaafi lahaa maxkamada ujradeeda. Adeegyadeena ma laha ujrad, adeegyadeena waa bilaash.

## Ma rabtaa in aad wax dheerad ah ka ogaatid sidii aad u heli lahayd bilaw cusub iyo fursadaha helitaanka rikoodhka dembi yareen?

Liis faahfaahsan oo ku saabsan su'aalaha badanaa la'iska weydiiyo adeegyada gargaarka ee denbi yarenta waxaad kaheli karti shabaka:

www.sandiegocounty.gov/public_defender.

## Diyaar ma u tahay Biloow Cusub?

Si aad u codsato gargaar, fadlan buuxi "Fresh Start Request for Assistance" foom laga helo: www. sandiego.gov/public_ defender. Hadii aad heysan kombiyuutar, wac Xafiiskayaga (619) 338 -4700 waxaana kuu soo diri doona Codsi , ama waxaad ka soo qaadan karta codsi xafiisyadeena.

Marka aan helno codsigaaga, mid ka mid ah qareenadayada waxay dib u eegi doonaan diiwaanka dembigaaga oo ay kuu abuurayaan qorshe cusub. Dhammaan Macluumaadka waxaa lagu kaydiyaa qarsoodi.

## Maxaad sameyn karta si aad ugu diyaargarowdo Biloow Cusub?

Samee liis ku saabsan dhammaan waxyaabaha wanaagsan ee aad samaysay si aad ugu hormartid noloshaada.

Waxaad aruurisa wixii dukuminti ah/ diiwaanka oo muujinaya waxyaabo waxtar leh oo aad u samaysay naftaada, qoyskaaga iyo bulshadaada illaa kiisaskaaga u biloowday ( tusaale ahaan waxbarashada, shaqada, shaqada mutadawiciinta, ballanqaadka qoyska iyo wixii la mid ah. )

## Su'aal ma qabtaa?

Wixii su'aal ah kusoo dir emailkan: Fresh.Start@sdcounty.ca.gov ama soo wac (619) 338-4700 oo waydiiso inaad la hadasho Biloow Cusub qareen.